CUMRADA IYO XAJJKA ACMAASHA LA SAMEEYO

Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh

Allaah Swt baa mahad iska leh, Nebigeena muxammed baa ammaan oo dhan iska leh intaa kadib.

Walaalayaal waxaan jeclaystay inaan idinla wadaago qoraal yar oo kusaabsan qaabka xajjka iyo cumrada loo guto intuu allaah swt iga garansiiyo. Walaalayaal waxaan rabaa inaan dhowr qodod ka hor mariyo intaanan u gudbin mawduuceena kusaabsan xajjka iyo cumrada qaabka loo guto.

1. Walaalayaal marka hore waa inaad ku dadaashaan ikhlaaska camalkan wayn ee xajjka ah, oo aad ka dhigtaan mid aad allaah swt keligiis ula jeedaan oo aad ugudanaysaan. Aysan idinka noqon mid ah ha la idin dhaho hebel amase hebla xajjkay aaday oo way soo xajiday ama xajiyay hebel.

2. Walaalayaal waxaad garan waysaan ee kusaabsan xajjkiina, waa inaad waydiisaan cida idiinkaga aqoon roon. Sababtoo ah waxaa laga yaabaa inaad khalad wayn ku dhacdaan kaasoo xajkiina wax udhima.

3. Walaalayaal ka fogaada hadalada aduunka kusaabsan iyo laqwiga.

Intaas kadib waxaynu galaynaa mawduuceena insha'allaah. Allaah swt baan waydiisanaayaa inuu iifududeeyo ikhlaasna iiga dhigo cidii uu gaarana uu ku anfaco anigana miisaanka aakhirana iisaaro aamiin yaa allaah.

WAXA LA ORANAAYO XIRASAHADA CUMRADA IYO XAJJKA MARKA LASOO GAARO MEEQAAMKA LAGA XIRTO

Sida Wanaagsan Nebigana Scw Kasugan Waa In Cumr Iyo Xaj La Isku Daro. Marka hore waxaad xiranaysaa cumrada, markaad cumraysato oo xalaalowdo baad xajj xiranaysaa. Hadaba marka hore waa inaad xirataa **CUMRAH,** Waxaana Idiin sheegi doona Meeqaamka Laga Xirto Marka Lasoo Gaaro qolyaha idin wada meeshaad ka xiranaysaan **CUMRADA**. Markaad xiranayso **CUMRADA** Waxaad leedahay sidatan:

‘’**ALLAAHUMA LABAYKA CUMRAH”** اللهم لبيك عمرة Adigoo niyaysanaaya markaad **CUMRAYSATO** kadib inaad XAJJ xiran doonto insha’allaah.

ADKAARTA MARKAAD XIRATO CUMRADA AMASE XAJJKA KADIB

لَبَيْكَ اَللّٰهُمَ لَبَيْك، لَبَيْكَ لَا شَرِيْكَ لَكَ لَبَيْك، إِنَ الْحَمْدَ وَالنِعْمَةَ لَكَ وَالُمْلْكُ، لَا شَرِيْكَ لَك

‘’LABAYKALAHUMA LABAYK, LABAYKA LAA SHARIIKA LAKA LABAYK, INAL XAMDA WA NICMATA LAKA WALMULKU, LAA SHARIIKA LAKA’’. Adkaartaan xiddi oo badi inta awoodaada ah.

ACMAASHA LARABO IN LALA YIMAADO MARKA MASJIDKA XARAMKA LAGALAAYO OO CUMRAH AMA XAJJ LAGUDANAAYO

1) Markaad **XARAMKA** galayso ku gal lugta midig adigo akhrinaaya ducadan hoose:

‘’ BISMILLAAHI, WASALAATU WASALAAMU CALAA RASUULILLAAH, ACUUDU BILAAHIL CADIIM, WABI WAJHIHIL KARIIM, WASULDAANIHIL QADIIM, MINASHAYDAANI RAJIIM, ALLAHUMA IFTAX LII ABWAABA RAXMATIKA..’’.

بِسْمِ اللهِ وَالصَلَاْةِ وَالسَلَاْمُ عَلَىْ رَسُوْلُ اللهِ أَعَوْذُ بِاللهِ اَلْعَظِيْم وَبِوَجْهِهِ اَلكَرِيْم وَسُلْطَانِهِ القَدِيْم مِنَ الشَيْطَانِ الرَجِيْم اَللّٰهُمَ اِفْتَحْ لِيْ أَبْوَابَ رَحْمَتِكَ

Masjika XARAMKA 7da jeer ee KACBADA lagu dawaafo, wuxuu utaagan yahay labada rakacadood ee sunnada ah ee markii masjid lagalo latukan lahaa.

2) Masjidka markaad soo gasho waxaa udhaqaaqaysaa dhinaca **XAJARUL ASWADKA** hoos ka fiiri sawirka waa lambarka 1aad. Waana meesha aad **DAWAAFKA** Ka bilaabi doonto, Waxaa lagaa rabaa inaad **XAJARUL ASWADKA** dhunkato hadii ay kuusuuroobi wayso ciriiriga dartiis, ku taabo gacantaada kadibna gacantaada dhunko, hadaad awoodi waydo inaad toos udhunkato amase kacantaada ku taabato, gacanta ayaad ku taagaysaa sida salaanta oo kale adigoo oranaaya **BISMILLAAH ALLAAHU AKBAR** mana dhunkanaysid ilayn ma taabanine.

Markaad dawaafaysid, hadii aad dhex mart KACBADA iyo meesha yar ee wareegsan oo KACBADA ka go'an ee ay sawirka hoose kaga qoran tahay: اَلْحِجْر **XIJRI ama** الحجر اسماعيل **XIJRI ISMAACIIL** waxay ka mid tahay KACBADA oo dawaafkaas majiro sababtoo ah waxaad lamid tahay adigoo kacbada ku dhex jira ee matihid qof KACBADA ku wareegay.



3) Waxaad u dhaqaaqaysaa dhinaca midig **KACBADUNA** waa inay kaa qabataa dhinacaaga bidix. Markaad gaarto **RUKNIL YAAMAANI** Baad gacanta kutaabanaysaa hadii aad awoodo oo aysan meeshu ciriir ahayn mana oranaysid **ALLAAHU AKBAR** mana dhunkanaysid waxaadna akhrinaysaa aayada hoos ku qoran:
‘’ RABANNAA AATINAA FIDUNYAA XASANATAN WAFIL AAKHIRTI XASANATAN WA QINAA CADAABA NAAR’’

{ رَبَّنَا آتِنَا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِي الْآخِرَةِ حَسَنَةً وَقِنَا عَذَابَ النَّارِ }

RUKNIL YAAMAANI waa rukniga ama **TIIRKA 3AAD** marka **XAJARUL ASWADKA** laga soo tiriyo. Sawirka aan soo dhaafnay ka fiiri Ruknil Yaamaani.

Markasta oo aad soo marto **XAJARUL ASWADKA** waa inaad tiraahdaa **ALLAAHU AKBAR**. Inta kale ee aad **DAWAAFAYSID** waxaad akhrisan kartaa wax kasta oo **adkaar iyo quraan** ah ee kuu fudud, wax gaar ah majiraan oo nebiga scw ka sugan.

DAWAAFKA waxaad ka bilaabaysaa sidaan soo sheegnay XAJARUL ASAWDKA isaguuna ku dhamaanayaa. Tusaale: Dawaafka koowaad waxaad ka bilawday xajarul aswadka, markaad isaga kusoo noqotana, waxaa kaa dhamaaday dawaafkii koowaad. Dawaafka labaadna wuxuu kuu bilaabmayaa markaad xajarul aswadka ka dhaqaaqdo sidaas bay kuugu socon dawaafkaagu ilaa aad 7da jeer ka dhamayso.
Waxaase muhiim ah inaan ogaano in 3dexda dawaaf ee hore in la yara rucleeynaayo ‘’ orod yar ‘’ 4ta dawaaf ee soo harayna waa socod caadi ah waana

RAGGA oo kaliya ruclayntu. Sidoo kale RAGGA waxaa laga rabaa inay go'a cad ee ay huwan yihiin ay ka hoos mariyaan kilkisha midig. Korna kasaaraan garabka bidix. Markuu dawaafka dhamaado go'a RAGGU caadi ayay u huwanaayaan.

FIIRO GAAR AH:

4) Markaad dawaafka dhamayso waxaad aadaysaa **MAQAAMU IBRAAHIIM** waxaadna akhrinaysaa aayadaan:
''WATAKHIDUU MIN MAQAAMI IBRAAHIIMA MUSALLAA''

{ وَاتَّخِذُوا مِنْ مَقَامِ إِبْرَاهِيمَ مُصَلًّى }

Maqaamu ibraahiim gadaashiisa waxaad ku tukanaysaa laba rakacadood adigoo usoo jeedsanaaya xaga **KACBADA**, rakacada hore waa **faataxada iyo qulyaa ayuhal kaafiruun,** rakacada labaadna waa **faataxada iyo qulhuwale.** Hadii ay meeshu saxmad '' ciriiri '' tahay ku tuko meel kale oo aan ciriiri ahayn.

Kadib waxaad ujeesanaysaa **XAJARUL ASWADKA** waadna taabanaysaa hadii aadan awoodin inaad taabato waad iskaga tegaysaa oo **GACANTA** uma taagaysid.

5) Kadib waxaad aadaysaa **ZAMZAMKA** si aad usoo cabto nebigana scw wuxuu yiri: **zamzamka** waa wixii loo cabo. Hadaba niyooso markaad cabayso waxaad jeceshahay inaad hesho. Waxa ugu wayn ee aad uniyaysanaysana ka dhigo inuu allaah swt janadiisa ku geliyo insha'allaah.

6) Kadib Waxaad aadaysaa dhinaca **SAFA IYO MARWAH.** Markaad SAFA udhawaato waxaad akhrinaysaa aayadaan:

''INNA SAFFAA WAL MARWATA MIN SHACAA'IRI LLAAHI ''.

{ إِنَّ الصَّفَا وَالْمَرْوَةَ مِن شَعَآئِرِ اللهِ }

Kadib waxaad leedahay sidatan:
''ABDA'U BIMAA BADA'ALLAAHU'' { أَبْدَأُ بِمَآ بَدَأَ اَللهُ بِه }

SAFA waa buur yar oo dhagax ah. Hadaba waxaa wanaagsan inaad fuusho buurta yar, hadii aad awoodi waysidna hoosteeda iska istaag. Dabadeed waxaad usoo jeedsanaysaa dhinaca **KACBADA**. kadib waxaad oranaysaa ''Allaahu Akbar, Allaahu Akbar, Allaahu Akbar 3dex jeer. Waxaad kaloo akhrinaysaa **ADKAARTAAN:**

''LAA ILLAAHA ILLALLAAHU WAXDAHU LAA SHARIIKA LAH, LAHUL MULKU

WALAHUL XAMDU WAHUWA CALAA KULI SHAY'IN QADIIR. LAA ILAAHA ILLALLAAHU WAXDAH, ANJAZA WACDAH, WANASARA CABDAH, WAHAZAMAL AXZAABA WAXDAH''.

{ لا إله إلا الله والله أكبر، لا إله إلا الله وحده لا شريك له، له الملك وله الحمد وهو على كل شيء قدير، لا إله إلا الله وحده أنجز وعده ونصر عبده وهزم الأحزاب وحده }

Markaad **ADKAARTAAS** akhriso baad kuducaysanaysaa wixii aad awoodo, hadana **ADKAARTAAS** baad mar labaad akhrinaysaa hadana waad ducaysanaysaa, hadana **ADKAARTAAS** baad mar sadexaad akhrinaysaa, markaan ma ducaysanaysid. Waa 3jeer oo adkaar ah iyo laba jeer oo duco ah.

Kadib waxaad aadaysaa **MARWAH**, Waxaa jirta meel aad ku arki doonto laba **LAYR oo CAGAAR** ah oo xoogaa kala durugsan, waxayna udhexeeyaan **SAFA & MARWAH**. Hadaba labadaas Layr ee cagaaran dhexdooda ayaa laga rabbaa **RAGGU** inay rucleeyaan "yara ordaan" dumarkuse lagama rabo inay labadaas layr ee cagaaran ay rucleeyaan.
Markaad Gaarto **MARWAH** waxaadna akhrinaysaa wixii aad **SAFA** soo akhrisay oo kale. Laakiinse ma akhrinaysid **AAYADA** aad soo akhrisay markaad **SAFA** usoo socotay. Aayadaas waxaa la akhriyaa oo kaliya marka aad SAFA usoo socotid.

Intaad **SAFA & MARWAH** ukala noqonayso waa 7jeer waxaadna ka bilaabaysaa sidaan soo sheegnay **SAFA** waxaadna ku dhamaynaysaa **MARWAH**. Mar walba oo lasso gaaro labada layr ee cagaarana RAGGU waa inay yara ordaan. Markii ladhahmeeyo SACYIGA SAFA IYO MARWAH, waa in uu qofka ragga ahi timaha gaabsado oo uusan wada xiirin si uu markuu xajjka dhameeyo uu uxiirto maadaama laga rabo inuu xiirto markuu xajjka acmaashiisa dhameeyo. Dumarkuse waxay timaha iska jaraayaan wax qiyaastii le'eg xubinta farta.

Halkaas waxaa inoogu dhamaaday **CUMRO GUDASHADII**. Waxaadna noqonaysaa xalaal micnaheedu tahay wixii markii hore kuu banaanaa oo dhan baa kuu banaan hada.

ACMAASHA MINNA

Maalinta 8aad waxaa la aadayaa **Minnah**. Hadaba Minnah wax gaar ah oo lagaaga baahan yahay ma jiraan salaadana waa la gaabiyaa waana la isku daraa sida: duhur iyo casar baa la isku daraa iyagoo latukanaayo labo labo

rakaco, sidoo kale makhrib iyo cishe ayaa la isku daraayaa, waxaana loo tukanaayaa makhrib maadaama uu yahay sadex rakacadood sidiisa baa loo tukan, cishana laba rakacadood baa laga soo qaadayaa. Fajarna gooni baa loo tukan.

ACMAASHA CARAFAH

CARAFAH waxaa lagalaa duhurkii. Waxaana lagu tukadaaa DUHUR IYO CASAR oo la isku daray. Micnaha Duhur laba rakacood, Casarna laba rakacadood. Waxaana lajoogayaa CARAFAH ilaa ay qoraxdu ka dhacdo.
Hadaba Adkaarta ugu wanaagsan ee la akhristo marka **CARAFAH** lajoogo waa adkaartaan hoose:
''LAA ILLAAHA ILLALLAAHU WAXDAHU LAA SHARIIKA LAH, LAHUL MULKU WALAHUL XAMDU WAHUWA CALAA KULI SHAY'IN QADIIR''
{ لا إله إلا الله والله أكبر، لا إله إلا الله وحده لا شريك له، له الملك وله الحمد وهو على كل شيء قدير }
Waxaa la akhristaa wixii quraan iyo adkaar ah. Sidoo kale ducadana waa labadsadaa maadaama ay tahay jaanis aad uwayn.

HABEENKA LASEEXANAAYO MUSDALIFAH

Habeenkaas khaladka dhaca waxaa kamid ah: In ay **RAGGU** madaxa qariyaan waana wax khalad ah oo waa in uu madaxu banaanaado.
FIIRO GAAR AH: Subaxdii markaad soo kacdo oo aad salaada fajar tukato oo aad bixi rabtid sii guro DHAGGAXAAN yar oo gaaraaya ilaa iyo dhowr iyo toban. Sababtoo ah 7xabo waxaa kaa raba dhagaxtuurka. Inta kale iska qaado lacala hadii ay wax kaa lumaan si aad ugu baxsatid.

DHAGAX TUURKA



Markaad timaado JAMARATUL CAQABAH ‘’JAMARATUL KUBRAA’’ Waana Dhagaxtuurka ugu dambeeya markaad MINNAH soo gasho. Markaad dhagaxa tuuraysid, waxaad u jeedsanaysaa JAMARATUL CAQABAH, midigtaadana waa inay Minnah kaa xigtaa, Bidixdaadana waa inay MAKKAH kaa xigtaa sida sawirka kore.
Markasta ee aad dhagaxa ku tuuraysid godka waxaad oranaysaa **ALLAAHU AKBAR**.

DAWAAFU IFAADAH

Markaad dhagaxtuurka soo dhamayso waxaad aadaysaa **XARAMKA** si aad usameeyso dawaafkii kacbada iyo sacyigii ‘’socodkii’’ SAFFAH IYO MARWAH. Hadaba waxaad usamaynaysaa sidaad markii aad **CUMRAYSANAYSAY** samaysay.

Kadib ragga timaha ayay xiiranaayaan. Dumarkuna Waxyar ayay iska jaraayaan **OO XUBINTA FARTA LE'EG**. Wixii intaas kadambeeya, waxaad noqonaysaa xalaal oo waxaa kuu banaan wax kasta oo markaagii hore kuu banaanaa.

MINNAH IYO AYAAAMU TASHRIIQ '' 11AAD, 12AAD 13AAD''

Markaad Kasoo dhamaato Kacbada waxaad aadaysaa MINNAH oo lajoogaayo 3habeen. Waana habeenka 11aad, 12aad iyo 13aad ee bisha dilxijjah.
Maalin walba bacdal duhur waxaad aadaysaa JAMARAATKA ''meesha dhagaxtuurka'' oo waxaad ku dhagax tuuraysaa JAMRO walba 7 dhagax. Kadibna intaad qiblaada ujeedsato baad ducaysanaysaa. Duco gaar ahna masoo aroorin.

Dhagax tuurka koowaad ee ladhaho **JAMARATUL SUQRAA** '' dhagaxtuurka yar'' waxaad ku tuuraysaa 7 dhagax, dhagax walbana markaat tuurayso waxaad leedahay **ALLAAHU AKBAR**. Kadib baad qiblada qaabilaysaa waadna ducaysanaysaa intaad ducaysan kartid adigoo gacmaha kor utaagaaya.

Kadib waxaad u gudbaysaa Dhagax tuurka labaad ee layiraahdo **JAMARATUL WUSDAA** ''dhagaxtuurka dhexe'' isagana 7 dhagax baad ku tuuraysaa adigoo yeelaaya sidii dhagaxtuurkii hore oo kale kadibna waad ducaysanaysaa.

Kadib waxaad ugudbaysaa **JAMRATUL KUBRAA AMA JAMRATUL CAQABAH** ''dhagaxtuurka wayn'' isagana 7 dhagax baad ku tuuraysaa adigoo yeelaaya sidoo kuwii ka horeeyey. Jamradaan dambe waxaa lasuneeyaa oo fiican markaad dhagaxaanta tuuranayso in ay MINNAH kaa xigto midigtaada, KACBADANA ay kaa xigto bidixdaada. Hadiise aadan awoodin saxmada darteed dhib malayan. Kadib ducayso.

FIIRO GAAR AH: Sawirka Jamaraatka Fiiri Siday Iskugu Xigaan Iyo Meesha La istaagaayo Marka Laducaysanaayo.

Markay dhamaato ayaamu tashriiq ''11aad, 12aad 13aad'', ayaa maalinta 13aad markaad tuurato JAMARAATKA baa aadaysaa gurigii aad degnayd ee MAKKAH waxaadna xalaaloowday mid dhamaystiran oo waxaad noqotay sidii qof aan xajj ku jirin oo kale oo wax walba waa kuu banaan yihiin.

Maalintaad ka socdaalaysid MAKKAH oo aad rabtid inaad ku noqotid wadankaagii, baa lagaa rabaa inaad la timaado DAWAAFUL WADAAC. Waxaad aadaysaa XARRAMKA kadib waxaad la imaanaysaa DAWAAF iyo inaad ku tukato MAQAAMU IBRAAHIIM gadaashiisa iyo inaad ZAMZAM kii cabto iyo inaad latimaado SACYIGII SAFFAH IYO MARWAH. Kadib way kuu dhamaatay wax walba insha'allaah waadna safri kartaa.

Insha'allaah intaas baan ku soo gaabinaayaa. Intaan soo sheegnayna waa inta ugu muhiimsan, Inta kale waxaa idiin sheegaaya qolyaha xamlada ah ee idin wada. Wixii aan asiibay allaah swt baa ku mahadsan. Wixii aan khaldayna waa naftayda iyo shaydaan allaah swt ha iidhaafo cidii akhrisatana allaah swt kuma aafeeyo aamiin.

Wabillaahi tawfiiq.

Akhuukum Fillaah Abu Abdirahman